

NAXWAHA CUSUB EE

AFSOOMALIGA

B U U G G A

1d

QORE : Maxamed Xaaji Xuseen Raabbi)

(JAAMACADDA UMMAADDA SOOMAALIYEED)

النحو الجديد للغة

بالصوماليّة

NAXWAHA CUSUB EE

Q. t. r.
200 +

AFSOOMALIGA

B U U G G A

1d

QORE : Maxamed Xaaji Xuseen Raabbi)

(JAAMACADDA UMMAADDA SOOMAALIYEED)

النحو الجديد للغة

بالصوماليّة

All Rights Reserved

1416 - 1995

TUSAHA

Arar	1
1. Codayn	3
1.1. Alifba	3
1.2. Xaraf	4
1.3. Cod	4
1.4. Laylisyo	4
2. Ereyeyn	6
2.1. Magaca	6
1.1. Cayn	6
1.2. Qodob	6
1.3. Wadar	8
1.4. Laylisyo	8
2.2. Falka	9
2.1. Goorayn	9
2.2. Qofayn	9
2.3. Laylisyo	10
2.3. Qurubka	12
3.1. Xidhiidhiyaha <u>iy</u>	12
3.2. Xidhiidhiyaha <u>ama</u>	12
3.3. Xidhiidhayaha <u>OO</u>	13
3.4. Laylisyo	13

3. <u>Weedhaynta</u>	17
3.1. Weedhaha saleed	17
1.1. Reebid	17
1.2. Qurub weedheed	18
3.2. Noocyada weedhaha saleed	18
2.1. Nooca 1d	18
2.2. Nooca 2d	19
2.3. Nooca 3d	19
2.4. Nooca 4d	19
2.5. Nooca 5d	20
3.3. Laylisyo	20
4. Hadal iyo qoraal	22
4.1. Magacuyaal yeeleed	23
4.2. Qurubka "ma"	26
4.3. Laylisyo	28
5. Astaamaynta	29
Appendices	
I. Hadalka iyo Qoraalka	30
II. Jawaabaha	44
III. Ereybixinta	49

ARAR

Buuggani waxa weeye buug yar oo qeexayaa fikrado saleed oo Naxwe. Waxa na aan ugu talagalay ardayda dugsiyada iyo waxbarashada dadweynaha ba qofkii doonaya in uu barto naxwahaha afkiisa hooyo. Todoba xubnood ayaa uu ka kooban yahay : 1. *CODAYN*, 2. *EREYEYN*, 3. *WEEDHAYN*, 4. *HADAL iyo QORAAL*, 5. *ASTAAMAYN*, 6. *EREYBIXIN iyo* 7. *JAWAABAHA LAYLISYADA*.

1. CODAYN : Xubinta codaynta waxa aan ku qeexay faraqa u dhexeeya alifba, xaraf iyo cod, Alifba'da waxa aan isugu hawlay Soomaalida iyo shisheeyaha baranaya afkeenna ayaa dhib ku qaba akhriska alifba'dii hore ee guddida Afsoomaaligu garatay. Dareerinta qaamuusyada iyo ereybixintu na waa ay suurtoobi weydey. Middan waxa aan ugu talagalay tijaabo ahaan si ay soomaalida akhrisataa buuggan u naqdiyaan oo talooyin uga dhiibtaan.

2. EREYEYN : Ereyeynta waxa weeye Lafaguridda dhaqanka iyo dhismaha ereyyada afkeenna hooyo, ama cilmiga barashda dhaqanka ereyga. Halkan waxa ku qeexan habka ugu dambeeyey ee loo kala qeexo qaybaha hadalka. Habkaas oo qaba in qayb hadal oo kasta ay lee tahay sumado ay kaga duwan tahay qaybaha kale. Marka aan habkaas ku eegay Afsoomaaliga waxa uu lee yahay saddex qaybood oo guud hadalkiisu : Magac, fal iyo Qurub.

3. WEEDHAYN. Xubintani waxa ay ku saabsan tahay dhaqanka naxweed ee weedhaha Afsoomaaliga, ama cilmiga barashda dhaqanka weedhaha. Habka loo qeexo weedhaha saleed iyo noocyadooda qaybta ugu horraysa ayaa aan ku qeexay.

4. HADAL iyo QORAAL : Waxa aan kaga faallooday xubintan dhawr meelood oo marka hadalka ay isku duubmaan laba erey. Marka qoraalka waxa laga ma maarmaan ah in la kala qoro ereyyada isku koobma. Qoraagu waa in uu aqoon u lee yahay meesha erey ka bilaamo iyo meesha uu ku dhammaado. Waa in uu kala sooci karaa koobidda, lifaaqaynta iyo lammannaanta.

Waa xubin muhim ah oo ay habboon tahay in uu akhriste kasta iyada ku horreeyo si uu u kaso sababaha ereyyo badan oo Soomaalidu hadda isku qorto aan u kala qoray.

5. ASTAAMAYN : Xubintani waxa ay ku saabsan tahay habka ay fikradaha weedheed u qorsheysmaan. In aan weedh saleed la kala astaamayn oo keli ah ayaa aan wax ka tilmaamay. Weedhi haddii ay sal tahay, astaan gadaal ka raacda oo keli ah ayaa ay yeelataa.

6. JAWAABAHA LAYLISYADA. Xubin kasta oo buuggan (Xubnaha 6d iyo 7d mooyaan ee) waxa weheliya Laylisyo. Laylisyada waxa aan ugu talagalay in uu akhristubu isku laylyo kasidda fikradaha saleed ee naxwe ee buuggan kooban ku qeexan ; dabeed na ay u suurtagasho hubinta weydiin kasta jawaabteeda. Waxa habboon marka hore, in akhristuhu ka shaqeeyo dhammaan laylisyada xubin kasta, kadib na hubiyo in Jawaabihiisu la mid yihiin jawaabaha buuggan.

7. EREYBIXIN : Waxa buuggan ku jira ereyyo farsamo oo badan. Kolkaas xubintani waxa ay ku saabsan tahay qeexidda macne ee erey farsamo oo kasta iyo ereyyo kale oo Afcarabi, Afingiriisi iyo Aftalyaani ah oo macne ahaan la gudboon.

1. CODEYIN :

Codeyintu waa cilmiga barashada codadka, ha ahaato sida codku u samaysmo ama sida uu codadka kale ugu dhexdhaqmo. Xubintan waxa aan ku kala qeexayaa faraq u dhexeeya : 1. Alifba, 2. Xaraf iyo, 3. Cod.

1.1. Alifba : Waxa weeye calaamdaha ama sumadaha ugu yar ee dhammaan codadka af lee yahay lagu qori karo ama lagu sunti karo. Hab gaar ah oo is dabo joog ah ayaa ay lee tahay. Qaamuus marka la samaynayo ayaa alifba'da si gaar ah loogu baahan yahay. Alifba aan ka sameeyey shibbanayaashii iyo shiqalladii guddida Afsoomaaligu soo saartay waa tan :

<u>Weyn</u>	<u>Akhriga</u>	<u>Yar</u>	
1. A	(a)	a	
2. B	(ba)	b	
3. T	(ta)	t	1. <u>Shaqalle :</u>
4. E	(ee)	E	a, e, i, o, u.
5. J	(ja)	j	
6. X	(xa)	x	
7. D	(da)	d	2. <u>Shibbanayaal.</u>
8. I	(i)	i	b, t, j, x, d, r,
9. R	(ra)	r	s, g, c, f, q, k, l, m, n,
10. S	(sa)	s	w, h, y.
11. G	(ga)	g	
12. C	(ca)	c	
13. F	(fa)	f	
14. O	(o)	o	
15. Q	(qa)	q	
16. K	(ka)	k	
17. L	(la)	l	
18. M	(ma)	m	
19. N	(na)	n	
20. U	(u)	u	
21. W	(wa)	w	
22. H	(ha)	h	
23. Y	(ya)	y	

Marka aad akhrido alifba'dan waxa aad ogaanaysaa in aan ka tegay shibbanayaasha kh, sh, dh. iyo shantii shaqal ee dhaadheeraa ; aa, ee, ii, oo, iyo uu. Sababaha aan uga tegay waa labo : (i) marka hore waxa ay ka kooban yihiin laba sumadood oo alifba'da ku jira, markaas waa celcelis aan alifba'du u baahnayn. (ii) Midda labaad ereyyada ay ugu horreeyaan waxa ay

qaamuuska kaga aadayaan meelo ay ereyyo kale ku aadayaan, sida :

Kh	Waxa ay ku aadaysaa meesha	K
Sh	" " " " "	S
Dh	" " " " "	D
Aa	" " " " "	A
Ee	" " " " "	E
Ii	" " " " "	I
Oo	" " " " "	O
Uu	" " " " "	U.

Tiro ahaan alifba'dani waxa ay ka kooban tahay saddex iyo labaantan (23) xaraf ama sumadood.

1.2. Xaraf waa calaamadda ama sumadda alifba'da ka mid ah. kolkaas waxa aan odhan karaa Afsoomaaliga alifba'diisa waxa ku filan saddex iyo labaantan (23) xaraf oo keli ah.

1.3. Cod waxa weeye sanqadh afka ka soo baxda oo ay ka wakiil noqon karaan hal xaraf ama labo xaraf, sida "c", iyo "sh". Codka hore ee "c" waxa ka wakiil ah hal xaraf, codka dambe ee "sh" se waxa ka wakiil ah labo xaraf, "s" iyo "h", oo isku biiray. Halkan waxa ku cad in Afsoomaaliga xarfihisa iyo codadkiisu aanay isku aadanayn. Middaas waxa la wadaaga afaf badan oo ay ka mid yihiin Afcarabiga, Aftalyaaniga iyo Afingiriiska. Ereyyada dhar, sheekh iyo qish mid waliba waxa uu ka kooban yahay Saddex cod-dh-a-r, sh-ee-kh, iyo q-i-sh. Haddii se laga eego xagga xarafaha, mid kasta waxa uu ka kooban yahay afar xaraf d-h-a-r, q-i-s-h, s-h-e-k.

1.4. LAYLISYO

Layliska 1d. Ereyyadani meeqa xaraf baa ay ka kooban yihiin, bal "kala sooc sida tusaalaha".

- | | |
|---------------------------|---------------------|
| 1. dad_____ d-a_____ (2) | 2. qof_____ () |
| 3. keli_____ () | 4. talo_____ () |
| 5. baad_____ () | 6. diin_____ () |
| 7. awr_____ () | 8. kow_____ () |
| 9. shiish_____ () | 10. Shaadh_____ () |
| 11. Sheekh_____ () | |

Laylika 2d. Ereyyadan meeqa xaraf baa ay ka kooban yihiin.

1. Shaadh s-h-a-d (4)
2. Roodhi _____ ()
3. Dhammaan _____ ()
4. Malab _____ ()
5. Cayn _____ ()
6. Khamiis _____ ()
7. Billad _____ ()
8. Biyo _____ ()
9. Caano _____ ()
10. Rasaas _____ ()
11. Nabadgelyo _____ ()

Laylika 3d. Ereyyadani meeqa cod baa ay ka kooban yihiin.

1. Dad d-a _____ (2)
2. Qof _____ ()
3. Keli _____ ()
4. Kan _____ ()
5. kuwan _____ ()
6. Godin _____ ()
7. Xubin _____ ()
8. Hadli _____ ()
9. casri _____ ()
10. ansaxin _____ ()
11. beddelid _____ ()

Laylika 4d. Ereyyada meeqa cod baa ay ka kooban yihiin.

1. Tookh t - oo - kh. _____ (3)
2. Haruur _____ ()
3. Masago _____ ()
4. Magaalada _____ ()
5. Gaashaan _____ ()
6. Bunduq _____ ()
7. Jidho _____ ()
8. Jirto _____ ()
9. Shabeel _____ ()
10. Hadhuudh _____ ()
11. Hadhuub _____ ()

2. EREYEYNTA.

Ereyeyntu waxa weeye cilmiga barashda ereyyada. Ereyyada Afsoomaaligu waxa ay guud ahaan u qaybsamaan saddex qaybood :

1. Magacyo
2. Falal iyo
3. Qurubbo.

2.1. Magacu waa qaybta koowaad ee qaybaha hadalka. waxa sumad u ah oo lagu gartaa oo uu yeeshaa :

1. CAYN.
2. QODOB, iyo
3. WADAR.

1.1. Caynku waxa weeye dhaddignimada ama laboodnimada magac, sida.

<u>Tusaalaha 1d :</u>	<u>labood</u>	<u>dhaddig</u>
	Nin	Naag
	oday	Habar
	awr	hal
	wan	lax
	orgi	ri
	aabbo	hooyo
	haldhaa	gorayo
	dawac/dacaw	
	dawaco/dacawo	

1.2. Qodobku waxa weeye erey ku lifaaqma magace oo ku biiraya macrifad ama aqoonsi. Walaw, qodobbada Afsoomaaligu badan yihiin, waxa aan xubintan kaga faalloonayaa oo keli ah QODOBBADA AQOONSI.

Saddex nooc oo guud oo dhaddig iyo labood leh ayaa ay u kala baxaan qodobbada aqoonsi, sida tusahan ku cad ;

Tusaha 1d.

	Labood	dhaddig
1.	ka	ta
2.	ku	tu
3.	kii	tii

Qodobbadani marka ay magacyada aan hore u soo sheegay ku lifaaqmaan, sidan ayaa ay u saameeyaan : 1. Marka ay ka iyo la ku biiraan :

Tusaalaha 2d.

Labood

ninka
odayga
awrka
wanka
orgiga
aabbaha
haldhaaga
dawaca/dacawga
dawacada/dacawada

Dhaddig.

naagta
habarta
hasha.
laxda
rida
hooyada
gorayada

2. Marka ay ku iyo tu ku biiraan :

Tusaalaha 3d.

Labood

ninku
odaygu
awrku
wanku
orgigu
aabbuhu
haldhaagu
dawacu/dacawgu
dawacadu/dacawadu

dhaddig

naagtu
habartu
hashu
laxdu
ridu
hooyadu
gorayadu

3. Marka ay kii iyo tii ku biiraan :

Tusaalaha 4d.

labood.

ninkii
odaygii
awrkii
wankii
orgigii
aabbihii
haldhaagii
dawacii/dacawgii
dawacadii/dacawadii

dhaddig

naagtii
habartii
hashii
laxdii
ridii
hooyadii
gorayadii

Haddii aad tusaalayaasha sare u fiirsato qodob kasta waxa ka dheegma ama ka xarfama dhawr qodob oo isaga hoos yimaada, sida tusahan 2d ku cad.

Tusaha 2d.

Labood			Dhaddig		
ka	ku	kii	ta	uu	tii
- ka	- ku	- kii	- ta	- tu	- tii
- a	- u	- ii	- sha	- shu	- shii
- ga	- gu	- gii	- da	- du	- dii
- aha	- uhu	- ihii	- ada	- adu	- adii

1.3. Wadartu waxa weeye sumadda saddexaad ee magacu yeesho. Noocyada wadareed ee Afsoomaaligu waa ay badan yihiin. Halkan se waxa aan kaga warramayaa magacyada uu ku biiro lifaaqa wadarayneed ee ka koobma shaqal iyo shibbane, (soo gaabin ; ab = shaqalka - a iyo shibbanaha - b ugu dameeya magaca oo mar labaad soo ceshama). Lifaaqan, ab, waxa uu raacaa magac lab oo hal allane (one syllable ama maqdad) ka kooban. Kelidooda iyo wadartoodu waxa ay qaataan, qodob lab, sida tusaalahan 5d.

Keli

mas - maska
 miis - miiska
 wan - wanka
 daad - daadka
 gees - geeska
 saf - safka
 taar - taarka

Wadar

masas-masaska
 miisas-miisaska
 wanan-wananka
 daadad-daadadka
 geesas-geesaska
 safaf-safafka
 taarar-taararka.

1.4. LAYLISYO

LAYSKA 1d. Ereyyadani waa ereyyo lab. Dhaddigooda meesha madhan ku qor.

labood

1. aar
2. ey
3. doob
4. faras
5. diiq
6. adeer
7. awow
8. abti
9. wiil
10. abees
11. sodog

dhaddig

- gool
-
-
-
-
-
-
-
-
-
-
-

LAYLISKA 2d. Ereyyadan qodob ku biiri, dabeed dhaddig iyo labood u kala sooc :

- | | | | |
|---------------|----------------|---------------|---------------|
| 1. Shaadh, | 2. Macawis, | 3. Garbasaar, | 4. Shukmaan, |
| 5. Masar, | 6. Maro, | 7. Surwaal | 8. Saacad, |
| 9. shaati, | 10. Fasaleeti, | 11. kab, | 12. suun, |
| 13. cimaamad, | 14. Shaal, | 15. Malkhabad | 16. Googarad, |
| 17. Kesheli, | 18. Weesaaq, | 19. silsilad, | 20. Fargal. |

Layliska 3d. Ereyyadan kelida ah wadartooda ku qor meesha bannaan.

- | | | |
|---------------|-------------|-----------------|
| 1. Nin _____ | niman _____ | 2. Fin _____ |
| 3. Tiir _____ | | 4. Mar _____ |
| 5. Muus _____ | | 6. Moos _____ |
| 7. Suun _____ | | 8. Shaadh _____ |
| 9. Hab _____ | | 10. San _____ |
| 11. Af _____ | | |

2.2. Falku waa qaybta labaad ee qaybaha hadalka. Sumadaha lagaga sooco qaybaha kale ee hadalka waxa ka mid ah 1. Goorayn (tense) iyo 2. Qofayn (person). Ereygii yeesha labadan sumadood waa fal.

2.1. Goorayntu waxa weeye habka falku isula rogrogo waqtiga. Ereyyada qaad, tag, weyn iyo cas waa fal, sidan ayaa ay goorayntoodu ama rogrogidoodu tahay :

Goorayn	goorayn	goorayn	goorayn	goorayn
amar	joogto	socod joogto	tagto	socod tagto
qaad	qaadaa	qaadayaa	qaaday	qaadayay
tag	tagaa	tegayaa	tegay	tegayay
weynaw	weynaadaa	weynaanayaa	weynaaday	waynaanayay
casaw	casaadaa	casaanayaa	casaaday	casaanayay

Waxa tusaalahan ku cad in ereyyo aynu hore tilmaame ugu naqaanay ay goorayn yeesheen oo fal noqdeen.

2.2. Qofayntu waa qaabka ama dhismaha falku yeesho marka uu magacuyaallada ku aado, sida tusahan 7d. ku cad :

Keli	waa	aan aad uu ay	Fal Socod Joogto	
			<u>tegayaa</u> <u>tegaysaa</u> tegayaa tegaysaa	<u>weynaanayaa</u> <u>weynaanaysaa</u> weynaanayaa weynaanaysaa
wadar		aannu aynu aydin ay	<u>tegaynaa</u> tegaynaa <u>tegaysaan</u> tegayaan	<u>weynaanaynaa</u> weynaanaynaa <u>weynaanaysaan</u> weynaanayaan.

Fig. 4 dhismaha falalka aan hoose ka suntanayni waxa uu la mid yahay mid ka mid ah kuwa sunta.

Tusahan waxa ku qeexan in uu yeesho shan (5) qofaynood marka falku uu ku aado magacuyaallda yeeleed (subject pronouns). Middan oo sii xoojinaysa in ereyyada Afsoomaaliga hawsha tilmaanta qabtaa ay fal yihiin qayb ahaan.

2.3. Laylisyo

Layska Id.

Dhammaan falalkan goorayntood waa goorayn amar. waxa aad u beddeshaa goorayn socod (1) joogto iyo (2) tagto ba :

	<u>amar</u>	<u>socod joogto</u>	<u>socod tagto.</u>
1.	cun	cunayaa	cunayay
2.	cab	_____	_____
3.	dheeraw	_____	_____
4.	qas	_____	_____
5.	door	_____	_____
6.	fur	_____	_____
7.	xidh	_____	_____
8.	jar	_____	_____
9.	cuslaw	_____	_____
10.	fududaw	_____	_____
11.	tir	_____	_____

Layliska 2d.

Dhammaan falalkani waa goorayn amar waxa aad u beddeshaa goorayn joogto iyo goorayn tagto.

	<u>amar</u>	<u>joogto</u>	<u>tagto</u>
1.	shid	shidaa	shiday
2.	dir	_____	_____
3.	hadal	_____	_____
4.	wac	_____	_____
5.	maqal	_____	_____
6.	bar	_____	_____
7.	tun	_____	_____
8.	gaabnaw	_____	_____
9.	jabnaw	_____	_____
10.	xidhnaw	_____	_____

Layliska 3d.

Meelaha madhan ee tusahan dhismaha ku habboon ee falalka ku buuxi.

	<u>M. yeeleed</u>	<u>fur</u>	<u>dhuuban.</u>
waa	aan aad uu ay	furay 2. _____ 3. _____ furtay irrida	1. _____ dhuubanaatay 4. _____ 5. _____
	aannu/aynu aydin ay	6. _____ furteen 9. _____	7. _____ 8. _____ 10. _____

Layliska 4d.

Meelaha madhan ee tusahan dhismaha ku habboon ee falalka ku buuxi.

			<u>Goorayn joogto</u>	
Keli	waa	aan aad uu ay	<u>hadal</u> 1. _____ hadashaa 3. _____ 5. _____	<u>buurnaan</u> buurnaadaa. 2. _____ 4. _____ buurnaataa
Wadar		aannu/aynu aydin ay	hadalnaa 7. _____ 8. _____	6. _____ buurnaataan 9. _____

2.3. Qurubku waa qaybta saddexaad ee hadlaka, sumadaha magaca iyo kuwa falka aan mid na yeelan. Halkan se waxa aan wax ka odhanayaa XIDHIIDHIYAASHA : 1. iyo, 2 ama iyo 3, oo.

3.1. Xidhiidhiyaha "iyo", wax uu isku xidhaa laba magaca, sida Tusaallaha 1d.

1. Cali iyo Cabdi ayaa tegay.
2. Waxa aan arkay caasha iyo Canab.
3. Shaati iyo surwaal baa ninku sitaa.
4. Wiilkii waran iyo gaashaan baa uu haystaa.
5. Caleen iyo midho ayaa geedku lee yahay.

3.2. Xidhiidhiyaha "ama", waxa uu kala reebaa laba magac ama laba fal.

(i) Marka uu kala reebo laba magaca waa sidan : Tusaalaha 2d.

1. Godin ama masaar ayaa aan soo gadanayaa.
2. Inanka ama inanta iigu yeedh.
3. Fariintan ninka ama naagta u sheeg.
4. Caasha ama cibaado ayaa maamuladdu rabtaa.
5. Agaasimuhu waxa uu doonayaa shaah ama bun.

(ii) Marka uu kala reebo labada fal na weedhaha "waa" xanbarsani iyo kuwa "baa/ayaa" xanbaarsani waa ay kala dhisma duwan yihiin, sida tusaalaha 3d.

(i) Weedhaha "ayaa/baa".

1. Gabadhii ayaa fadhida ama joogta hadda.
2. Koobkii baa dhacay ama jabay shalay.
3. Baabuurkii ayaa tegaya ama baxaya imminka.
4. Caleentii baa go'aysa ama daadanaysa xilligan.
5. Geedka ayaa abaarsaday ama qalalay mar hore.

(ii) Weedhaha "waa".

1. Gabadhii waa (ay) fadhidaa ama (waa ay) joogtaa hadda.
2. Koobkii waa (uu) dhacay ama (waa uu) jabay shalay.
3. Baabuurkii waa (uu) tegayaa ama (waa uu) baxayaa imminka.
4. Caleentii waa (ay) go'aysaa ama (waa ay) daadanaysaa xilligan.
5. Geedku waa (uu) abaarsaday ama (waa uu) qalalay mar hore.

3.3. Xidhiidhiyaha "00" waxa uu isku xidhaa laba fal, sida, Tusaalaha 12d,

1. Askarigii baa kacay oo eegay cadawgii.
2. Ilmihii ayaa kufay oo ooyay.
3. Intixaankii dhawr arday ayaa kasay oo bixiyay jawaab fiican.
4. Afadii ayaa dhaamisay oo rartay haamihii.

3.4. Laylisyo

Layska 1d.

Labadan weedhood isku darkooda u qor sida tusaalaha.

1. a. Maamulaha ayaa baxay.
b. Agaasimaha ayaa baxay.
t. Maamulaha iyo agaasimaha ayaa baxay.
2. a. Qalinka ayaa jabay.
b. Dhalada ayaa jabtay.
t. _____
3. a. Qalinka ayaa dhacay.
b. Qalinka ayaa jabay.
t. _____
4. a. Islaanta ayaa timid.
b. Inanta ayaa timid.
t. _____
5. a. Biyihii ayaa kululaaday.
b. Biyihii ayaa karay.
t. _____
6. a. Shaadh ayaa gubtay
b. Shaayad ayaa gubatay
t. _____
7. a. Raadiyaha ayaa daarmay.
b. Raadiyaha ayaa hadlay.
t. _____
8. a. Baabuur baa muuqda.
b. Baaskeel baa muuqda.
t. _____

- 9. a. Ilmaha caanihii baa ka xumaaday.
b. Ilmaha caanihii baa ka daatay.
t. _____
- 10. a. Neefkii libaax baa helay.
b. Neefkii libaax baa cunay.
t. _____
- 11. a. Gabadhii mas baa qaniinay.
b. Hooyadeed mas baa qaniinay.
t. _____

Layliska 2d.

Labadan weedhood kala reebiddooda u qor sidan Tusaalaha.

- 1. a. Sonkor ayaa aan soo iibinayaa.
b. Bariis ayaa aan soo iibinyaa.
t. Sonkor ama bariis ayaa aan soo iibinayaa.
- 2. a. Dhalo ayaa jabtay.
b. Muraayad ayaa jabtay.
t. _____
- 3. a. Caleentii baa daadatay.
b. Ubaxii baa daatay.
t. _____
- 4. a. Dabkii baa shidmay.
b. Dhuxushii baa shidantay.
t. _____
- 5. a. Daruur baa cirku lee yahay.
b. Ceeryaamo baa cirku lee yahay.
t. _____
- 6. a. Qalin i sii.
b. Masaxad i sii.
t. _____
- 7. a. Sinimihii Cali baa galay.
b. Riwaayaddii Cali baa galay.
t. _____
- 8. a. gurigii Caasha ayaa tagtay.
b. xaafadda Caasha ayaa tagtay.
t. _____

9. a. Shaadhkii ayaa jeexmay.
 b. Surwaalkii ayaa jeexmay.
 t. _____
10. a. Bakhaarkii Cali baa tegay.
 b. Dukaankii Cali baa tegay.
 t. _____
11. a. Inankii baa yimid.
 b. Inantii baa timid.
 t. _____

Layliiska 3d. labadan weedhood kala reebiddooda u qor sida tusaalaha.

1. a. Caashi waa (ay) timid.
 b. Caashi waa (ay) maqan tahay.
 t. Caashi waa (ay) timid ama (waa ay) maqan tahay.
2. a. Ninku waa (uu) hadalayaa.
 b. Ninku waa (uu) tegayaa.
 t. _____
3. a. Dabkii waa (uu) baxayaa.
 b. Dabkii waa (uu) shidmay.
 t. _____
4. a. Geedku waa (uu) magoollan yahay.
 b. Geedku waa (uu) cagaaran yahay.
 t. _____
5. a. Irriddu waa (ay) xidhan tahay.
 b. Irriddu waa (ay) ceshan tahay.
 t. _____
6. a. Geelii waa (uu) caymaday.
 b. Geelii waa la dhacay.
 t. _____
7. a. Awrkii waa (uu) lumay.
 b. Awrkii waa (uu) caymaday.
 t. _____
8. a. Cali waa (uu) gudbi intixaanka.
 b. Cali waa (uu) dhici intixaanka.
 t. _____

9. a. Gidaarku waa (uu) dhismi.
 b. Gidaarku waa (uu) dumi.
 t. _____
10. a. Xoghayihii waa (uu) baxay.
 b. Xoghayihii waa (uu) hoyday.
 t. _____
11. a. Ardaygu waa (uu) bukaa.
 b. Ardaygu waa (uu) cadhaysan yahay.
 t. _____

3. WEEDHEYNTA.

Weedhayntu waxa weeye cilmiga barashada weedhaha.

3.1. Weedhaha Saleed :

Waxa af waliba lee yahay WEEDHO SALEED oo gundhig u ah weedheyntiisa, dhawr nooc na waa ay u kala baxaan. Weedha saleed waxa badi lagu gartaa laba amuurood.

1. REEBBID : Erey ka ma bixi karo ereyyadeeda.
2. QURUB WEEDHEED ayaa ay badi xanbaarsan tahay ama la socda.

1.1. Reebiddu waxa weeye marka erey laga saaro weedh saleed. Macnaha gaar ahaaneed ee weedh saleed waa uu doorsoomaa ama burburaa marka bixid erey dhacdo, sida.

Tusaalaha 1d.

- Weedho saleed
1. Nin baa hadlay.
 2. Baabuur ayaa nin jiidhay.
 3. Aabbihiis baa lacag wiilka siiyey.

i) Marka ereyga hore baxo.

1. * baa hadlaya.
2. * ayaa nin jiidhay.
3. * baa lacag wiilka siiyay.

ii) Marka ereyga labaad baxo

- * 1. Nin hadlayaa
- * 2. Baabuur nin jiidhay.
- * 3. Aabbihiis lacag wiilka siiyey.

iii) Marka ereyga saddexaad baxo.

1. Nin baa.
2. Baabuur ayaa jiidhay.
3. Aabbihiis baa wiilka siiyey.

Weedhaha (i) iyo (iii) waa ay naxwe jaban yihiin. kuwa (ii) na waa macne dhiman yihiin. kolhaas waxa aynu odhan karnaa weedhaha saleed erey keli ihi ka ma bixi karo. Haddii se uu ka baxo, weedhii saleed waxa ay isu beddelaysaa weedh macne dhiman ama naxwe jaban.

1.2. Qurub weedheedku waxa weeye erey qurub ah oo inta badan la socda weedhaha saleed, sida saddexda weedhood ee sare (tusaalaha 1d).

Weedhahan hoos ku qoran, haddii aad ka bixiso ereyga suntan oo ah qurub weedheed waxa ay isu beddelayaan weedho dhiman, sida :

Tusaalaha 2d.

- | | |
|----------------------------------|-----------------------|
| i) 1. Wiilka <u>ayaa</u> yimid. | ii) 1. Wiilka yimid. |
| 2. Cabdi <u>baa</u> qalin helay. | 2. Cabdi qalin helay. |
| 3. Caashi <u>waa</u> tegaysaa. | 3. Caashi tagaysaa. |

Waxa tusaalahan ku cad in weedhaha qurubbada weedheed xanbaarsani ay buuxaan naxwe ahaan oo sal yihiin (erey ka ma bixi karo) ; marka qurubbada weedheed baxaan na ay weedhihii noqonayaa weedho naxwe ahaan dhiman oo aan sal ahayn.

Weedhaha saleed waa in ay naxwe ahaan iyo mance ahaan ba buuxaan oo aanuu erey na ka bixin karin.

3.2. Noocyada Weedhaha saleed waxa ay u qaybsamaan dhawr qaybood oo guud. Halkan se waxa aan kaga faalloonayaa qaybta kowaad oo ah kuwa falkoodu qaato hal magac.

Weedhaha saleed ee falkoodu qaato hal magac waxa weeye kuwa falkoodu yahay magudbe. Weedhaha noocan ihi waxa ay u qaybsamaan shan nooc marka xagga falkoodh laga eego : 1 *Fal* **ABYANE**, 2. *Fal* **MA-ABYANE**, 3. *Fal* **FARCAN**, 4. *Fal* **TILMAAMEED**. iyo 5. *Fal* **LAMMAANE**.

2.1. Nooca 1d ; Weedhaha nooca kowaad waxa ay xanbaarsan yihiin fal abyane sal ah. Fal abyanuhu gadaal keli ah ayaa uu iska rogrogaa. Dhammaan weedhaha hoos ku qorani waxa weeye weedho ah nooca kowaad oo falkoodu yahay fal abyane saleed, Sida :

Tusaalaha 3d.

1. Ardayga ayaa kacay.
2. Faraska ayaa dananay.
3. Wasiir baa hadlaya.
4. Shinbir baa duusha.
5. Ilmuhu waa uu koraa.

2.2. Nooca 2d. Weedhaha noocan labaad waxa ay xanbaarsan yihiin Fal ma-abayne. Fal ma-abyanuhu gadaal iyo hore ba waa uu iska rogroгаа. Weedhahani waa kuwo tiro yar, waxa ka mid ah kooxdan weedhan keli ah, Tusaalaha 4d.

1. Ergo ayaa timid.

2.3. Nooca 3d. Weedhahan nooca saddexaad waxa fal u ah fal farcan. Falka farcani waa fal aan sal ahayn. Falka farcani waxa weeye fal salkiisa lifaaq ku biirmay. Bal isu fiiri labadan fal, mid sal yahay, mid na, farcan yahay :

<u>SAL</u>	<u>FARCAN</u>	<u>LIFAAQ</u>
qaaday	qaad <u>may</u>	-m-
buuxay	buux <u>samay</u>	-sam-
baxay	bax <u>saday</u>	-sad-
qoday	qod <u>may</u>	-m-

Haddii aan weedho geliyo falalkan farcan, waxa dhalanaya weedho saleed oo falkoodu farcan yahay, hal magac na xanbaarsan, sida :

Tusaalaha 5d.

1. Miiskii baa qaadmay.
2. Ceelkii ayaa buuxsamay.
3. Edeysanihi waa uu baxsaday.
4. God baa qodmay.

2.4. Nooca 4d. Noocan afraad ee weedhaha saleed ee hal magac qaata waxa fal u ah fal hawl tilmaameed qabta (fal tilmaameed) sida weedhahan hoose.

Tusalaha 6d.

1. Cali baa dheer.
2. Geedka ayaa cagaaran.
3. Buugga ayaa yar.
4. Qalinka ayaa jaban.
5. Inanta ayaa cas.

2.5. Nooca 5d. Noocan shanaad ee weedhaha saleed ee hal magac qaata, waxa fal u ah fal lammaane (fal hawl tilmaame qabta iyo fal ahaansho), sida, tusaalaha 7d.

1. Cabdi waa uu weyn yahay.
2. Laantu waa uu cagaaran tahay.
3. Qorigu waa uu jaban yahay.
4. Hashu waa ay lammaan tahay.
5. Midabkiisu waa uu cas yahay.

3.3. Laylisyo

Layliska 1d.

Weedhahan kuwa macne buuxa (B) ku qor, kuwa macne dhiman na (D) ku qor, sida tusaalaha.

D	1.	Geed baxaya,
B	2.	Wiilka ayaa qoslay.
	3.	Baa meesha tegay.
	4.	Ayaa guriga ooday.
	5.	Intixaankii waa fiicanaa.
	6.	Mas baa jiiq leh.
	7.	Danjire ayaa xamar.
	8.	Buug jeexan.
	9.	Qalin waa jaban.
	10.	Ceel baa qodan.
	11.	Tuug baa boorso dafay.
	12.	Meel baa.

Layliska 2d.

Weedhahan qurub weedheed ku habboon ku qor meesha bannaan, sida tusaalaha.

1. Wiilka _____ ayaa _____ baasgeelka wata.
2. Ninku _____ geeljire.
3. Caasha _____ guriga tagaysa.
4. Caashi _____ ay tegaysaa xamar.
5. Kan _____ fasalka joogay.
6. Kani _____ uu joogay fasalka.
7. Cabdi _____ geedka koraya.
8. Cabdi _____ uu korayaa geedka.
9. Inantu _____ ay hadlaysaa.
10. Inanta _____ hadlaysa.

Layliska 3d.

Falka weedh kasta oo weedhahan ka mid ah fal abyane, fal ma-abyane, fal farcan, fal tilmaameed, iyo fal lammaane kol ba kii uu yahay falku ku qor meesha bannaan, sida tusaalaha.

- | | | |
|---------------|-----|--------------------------------------|
| <u>abyane</u> | 1. | Aabbiis baa <u>hadlaya</u> . |
| _____ | 2. | Xaaskii ayaa <u>yimid</u> . |
| _____ | 3. | Tuugga ayaa <u>baxsaday</u> . |
| _____ | 4. | Arday baa <u>baxay</u> . |
| _____ | 5. | Ilmihii baa <u>orday</u> . |
| _____ | 6. | Canbuhu waa uu <u>weyn yahay</u> . |
| _____ | 7. | Suunka ayaa <u>dheer</u> . |
| _____ | 8. | Reerkii baa <u>guuray</u> . |
| _____ | 9. | Irridii ayaa <u>furantay</u> . |
| _____ | 10. | Cibaado ayaa <u>timid</u> . |
| _____ | 11. | Wiilka ayaa <u>qoslaya</u> . |
| _____ | 12. | Albaabkii baa <u>xidhamay</u> . |
| _____ | 13. | Geedku waa uu <u>magoolan</u> yahay. |
| _____ | 14. | Qalinka ayaa <u>gaaban</u> . |
| _____ | 15. | Hablithii waa ay <u>yimaadeen</u> . |
| _____ | 16. | Ceelku waa uu <u>dheer yahay</u> . |
| _____ | 17. | Kan baa <u>cas</u> . |
| _____ | 18. | Ashuunkii baa <u>buuxsamay</u> . |
| _____ | 19. | Tani waa ay <u>culus tahay</u> . |
| _____ | 20. | Laantu ayaa <u>qalalan</u> . |
| _____ | 21. | Nalkii baa <u>damay</u> . |

Layliska 4d.

Weedhahan weedh kasta nooca 1d, 2d, 3d, 4d, iyo 5d, kii ay tahay ku hore qor, sida tusaalaha.

- | | | |
|-----------------|-----|-------------------------------|
| <u>Nooca 3d</u> | 1. | Baabuurkii baa qalibmay. |
| _____ | 2. | Mootadii baa jabtay. |
| _____ | 3. | Safarkii ayaa yimid. |
| _____ | 4. | Shaadhkan ayaa cad. |
| _____ | 5. | Ardaygu waa uu fiican yahay. |
| _____ | 6. | Shukmaankii baa jeexmay. |
| _____ | 7. | Caanaha baa badan. |
| _____ | 8. | Idinku waa aydin timaadaan. |
| _____ | 9. | Qolku waa uu kooban yahay. |
| _____ | 10. | Irriddii ayaa ceshantay. |
| _____ | 11. | Beeshii baa rooban. |
| _____ | 12. | Wiilkii ayaa ooyey. |
| _____ | 13. | Libaaxii baa booday. |
| _____ | 14. | Hilibkii ayaa solmay. |
| _____ | 15. | Baaquligu waa uu weyn yahay. |
| _____ | 16. | Annagu waa aannu nimid. |
| _____ | 17. | Raggi waa ay joogaan. |
| _____ | 18. | Furaashka ayaa fudud. |
| _____ | 19. | Joodarigu waa uu fudud yahay. |
| _____ | 20. | Madiibaddii ayaa daboolantay. |

4. Hadal iyo Qoral.

Afafka illaa maanta qoran mar waa lagu hadalaa, mar na waa la qoraa. Walaw aad loogu dadaalo in af kasta sida loogu hadlo loo qoro, hadda na weli aad ayaa ay u kala duwan yihiin af kasta heerkiisa hadal iyo heerkiisa qoraal, maxaa yeelay marka hadalka waa lagu degdegaa oo ay ereyyadu isku koobmaan. Marka se qoraalka erey kasta gaar ahaan baa loo qoraa oo loo habsadaa erey weliba bilawgiisa iyo dhammaadkiisa. Kolkaas Afsoomaaliga waxa ka buuxa meelo badan oo ay isku koobmaan laba erey ama in ka badani. Xubinta buuggan waxa aan ku qeexayaa dhawr meelood oo ay laba erey isku koobmaan, intii aan afka la qori illaa maanta na dadka aan aqoon cilmi ama naxwe u lahayn ay isku qoraan marka ay Afsoomaaliga qorayaan. Qeexiddani waxa aan u cuskaday laba sharci oo aasaas u ah kala qoridda ereyyada. Sharciga 1d. Erey la ma kala qori karo, haddii macnihiisu is beddelayo ama burayo, sida, tusaalahan 1d.

1. Erey sal ah. "arag" ----->

<u>kala qorid.</u>	
ar	ag
}	
2. Erey kooban "waxaan" ----->

wax	aan
}	
waxa	aan

Marka hore ee ereygu sal yahay kala qoriddiisu waa ay jaban tahay oo macnihiisii ayaa doorsoomay ama jabay. Marka dambe ee ereygu kooban yahay se, kala qoriddiisu labada siyood ba macnihoodu waa isla sidii hore, waayo koobidda ayaa laba macno yeelan karta, sida tusaalaha 2d.

1. Wax aan jirin baa aad sheegtay.
2. Waxa aan rabaa qalin.

Sharciga 2d. Haddii erey laba erey ama in ka badan laga dhigo, ereyyada ka dhashay kala qoridda, waa in erey kastaa ka mid noqdaa gaybaha hadalka ee afkaas, isaga oo aan macnihii hore wax iska beddelin.

Meelaha ay laba erey isku koomaan ee ay habboon tahay in la kala qoro marka qoraalka waxa ka mid ah labadan meelood : 1. MAGACUYAAL YEELE IYO EREY KALE, 2. QURUBKA "MA" IYO EREY KALE.

4.1. Magacuyaal yeeleed iyo erey kale waa isku koobmaan marka hadalka, waxa na habboon in la kala qoro marka qoraalka. Waxa shardi ah marka qoraalka in magacuyaal yeeleed gooni loo qoro, ereyga ku biirmaa nooc kasta ha ahaado ee.

Magacuyaallada yeeleed waxa weeye kuwan, tusaalaha 1d.

	<u>keli</u>	<u>Wadar</u>
Qofka 1d	aan	aannu/aynu
Qofka 2d Qofka 3d.	lab aad uu	aydin ay
	dhad.	ay

Ereyga ama ereyyada la koobma magacuyaalladan waa ay ka hor maraan, waxa na ka mid ah "in", "waxa", "baa", iyo "waa". Koobidda afartan erey iyo magacuyaallada yeeleed ee sare, waxa ay u fidsamayaa sidan, tusaalaha 2d,

1. "in" a) Koobid.

ma	inaan	tago	baa aad rabtaa ?
	inaannu	tagno	
	inaynu	"	
	inaad	tagtid	
	inaydin	tagtaan	
	inuu	tago	
	inay	tagto	
	"	tagaan	

b) Fidsanaan.

ma in	[aan	tago] baa aad rabtaa ?
	aannu	tagno		
	aynu	"		
	aad	tagtid		
	aydin	tagtaan		
	uu	tago		
	ay	tagto		
	"	tagaan		

2. "waxa" a) Koobid.

[waxaan	rabaa] roodhi.
	waxaannu	rabnaa	
	waxaynu	"	
	waxaad	rabtaa	
	waxaydin	rabtaan	
	wuxuu	rabaa	
	waxay	rabtaa	
	"	rabaan	

b) Fidsnaan.

waxa	[aan	rabaa] roodhi.
	aannu	rabnaa		
	aynu	"		
	aad	rabtaa		
	uu	rabaa		
	ay	rabtaa		
	"	rabaan.		

3. "Baa" a) Koobid

Qalin	[baan	haystaa]
		baannu	haysannaa	
		baynu	"	
		baad	haysataa	
		baydin	haysataan	
		buu	haystaa	
		bay	haysataa	
		"	haystaan]

b) Fidsanaan.

Qalin baa	[aan	haystaa]
		aannu	haysannaa	
		aynu	"	
		aad	haysataa	
		aydin	haysataan	
		uu	haystaa	
		ay	haysataa	
		"	haystaan]

4. "waa" a) Koobid

	[waan	arkay	Xamar.
		waannu	aragnay	
		waynu	"	
		waad	aragtay	
		waydin	aragteen	
		wuu	arkay	
		way	aragtay	
		"	arkeen	

b) Fidsanaan.

<u>Waa</u>	aan	arkay	Xamar.
	aannu	aragnay	
	aynu	"	
	aad	aragtay	
	aydin	aragteen	
	uu	arkay	
	ay	aragtay	
	"	arkeen	

4.2. Qurubka "ma" iyo erey kale waxa ay isku koobmaan marka hadalka, waxa na habboon in la kala goro marka Qoraalka. Waxa shardi ah marka qoraalka in qurubka "ma" gooni u qormo, erey kasta ha ku biiro ee, sida kuwa sare aan u kala qoray.

Ereyyada la koobmaa qurubka "ma" waa ay faro badan yihiin, halkan se waxa aan ku tilmaamayaa marka uu ku koobmo *MAGACUYAALLADA YEELEED, MEELEEYE, iyo FALAHAAANSHO, Sida, tusaalayaasha, 3d.*

1. "M. yeeleed" a. Koobid

Maan	tegin magaaladdi.
Maannu	
maynu	
maad	
maydin	
muu	
may	
"	

b) Fidsanaan.

Ma $\left[\begin{array}{c} \text{aan} \\ \text{aannu} \\ \text{aynu} \\ \text{aad} \\ \text{aydi} \\ \text{uu} \\ \text{ay} \\ \text{"} \end{array} \right]$ tegin magaaladii.

2. "Meeleeye" a. Koobid.

(i) Keli ah

$\left[\begin{array}{cc} \text{lafoole} & \text{kama} \\ \text{baabuur} & \text{kuma} \\ \text{Cabdi lacag} & \text{lama} \\ \text{walaalkay} & \text{uma} \end{array} \right]$ imam.

(ii) Lammaan

$\left[\begin{array}{cc} \text{Aabbohood xoolo} & \text{ugama} \\ \text{Ninku wiilka xamar} & \text{uguma} \\ \text{Odaygi xaaskiisa lacag} & \text{ulama} \\ \text{Aga asmuhu xafiiks qalab} & \text{kagama} \\ \text{Adeegihii qolka fure} & \text{kalama} \\ \text{Inantu inanka baabuur xamar} & \text{kulama} \end{array} \right]$ tegin.

b. Fidisanaan

(i) Keli ah

$\left[\begin{array}{cc} \text{lafoole} & \text{ka} \\ \text{Baabuur} & \text{ku} \\ \text{Cabdi lacag} & \text{la} \\ \text{walaalkay} & \text{u} \end{array} \right]$ ma iman.

(ii) Lammaan

Aabbohood xoolo	uga] <u>ma</u> tegin.
Ninku wiilka Xamar	ugu	
Odaygii xaaska lacag ula	ula	
Agaasimihu xafiika qalab	kaga	
Adeegihii qolka fure	kala	
Inantu inanka baabuur	Xamar kula	

3. "Falahaansho"

a) Koobid

Ninku waayeel maaha.
Ninkii wargeleen maahayn.

b) Fidsanaan.

Ninku waayeel ma aha.
Ninkii wargaleen ma ahayn.

4.3. Laylisyo

Ereyga qaansada ku jiraa waa laba erey oo isku koobmay. Fidsanaantooda ku qor meesha bannaan, sida tusaalaha.

1. (Waxaan) wax aan jirin baa uu sheegay.
 2. (Maan) _____
 3. (Maad) _____
 4. (Muu) _____
 5. (May) _____
 6. (Maannu) _____
 7. (Maynu) _____
 8. (Maydin) _____
 9. (May) _____
-] Tegin dugsigii.
10. (Goorma) _____ ayaa aad tegaysaa ?
 11. (Maka) _____ timid xamar ?
 12. (Buuggaan) _____ hayo ma rabtaa.
 13. (Qalinnu) _____ lee yahay ma ku tusay ?
 14. Saacad (bay) _____ sidataa.
 15. (Buuggaan) _____ jirin baa uu doonayaa.
 16. Ma hoy (baad) _____ haysataa ?
 17. (Waxaad) _____ lee tahay ma arag ?
 18. (Waqtima) _____ ayaa aad imanaysaa ?
 19. Mar (mala) _____ timid ardayda ?
 20. Weli xamar (maku) _____ tagtay dayuurad ?

5. ASTAAMAYNTA.

Astaamayntu waxa weeye arrin u gaar ah fikrad qeexid weedheed, iyadu na waxay ay salka ku haysaa sharcigan.

Weedh la ma kala astaamayn karo, haddii fikradda ay qeexaysaa doorsoomayso ama ay burayso. Halkan waxa aan ku qeexayaa (i). *WEEDHO ASTAAMAYN QALDAN*, (kuwa hakadka leh) iyo (ii). *WEEDHO ASTAAMAYN SUGAN* (kuwa aan hakadka lahayn).

Weedhaha, hoose, kuwa astaamaynta qaldani waa ay macne daran yihiin, kuwa astaamaynta sugani na waa macne toosan yihiin. Si aad macne darrida dhihidda weedha u ogaatid hadalka haki marka aad hakadka dhahaysid weedhaha hakadka leh, marka kale ha hakan.

Tusaalaha 4d.

(i)

1. Cali, ayaa yimid.
3. Ninka ayaa libaax, dilay.
5. Afadu waa, timid.
7. Baabuurkii baa, jabay.
9. Dabkii waa, shidmay.

(ii)

2. Cali ayaa yimid.
4. Ninka ayaa libaax dialay.
6. Afadu waa timid.
8. Baabuur baa jabay.
10. Dabkii baa shidmay.

Hakadku "," weedhaha hore macne ku biirin maayo. Markaas ereyyada weedh kasta kala soocidoodu qiime naxwe ma laha.

APPENDICES

I. HADALKA IYO QORAALKA


Luqadaha adduunka oo dhan, waxa jira hadal sheekaysi ama haasaawe ah oo caadi ah, iyo hadal qoran oo aan caadi ahayn. Hadalka sheekaysi ah waxa aan ku magacaabayaa hadal ; kan qoran na waxa aan ku magacaabayaa qoraal. Qoraalka Afsoomaaligu caadi ma aha ; maxaa yeelay dhegaha ayaa aan u baran. Kan hadalka ihi se waa caadi, oo dhegaha ayaa u bartay. Marka qoraalka, waxa laga ma maarmaan ah in erey kasta gooni loo qoro, inta badan na loo akhriyo. Marka hadalka see wax jirta, in lagu degdego dhihidda weedha oo taasi ay keento in ay is dhexy galaan ama isku dhafmaan dhawr erey.

Bilaa ba, uu afku ama luqaddu ka bilaabanto hadal ; barshada hadalka iyo barshada qoraalka na ay horrayso barshada hadalku, waxa dhacda in aan aragti aqooneed loo wada lahayn marka erey bilaabmo iyo marka uu dhammaado. Hadal na haddii dhakhso loogu dhawaaqo, oo aan aragti loo lahayn dhammaadka iyo bilawga erey, waxa la ma huraan ah in dhawr erey isku erey loogu dhawaaqo. Qaladka caynkaas ah ee hadalka ka duwa qoraalka, waxa leh afaf badan oo dunida lagaga hadlo, qaarkood ay yihiin kuwo muddo badan qorraa si xoog ah na looga shaqeeyey, oo uu ka mid yahay Afingiriisku. Walaw, faraqaas hadalku keenay intiisii badnayd laga dabar gooyay Afingiriiska, hadda na ilaa maanta, waxa marka hadalka isku dhafma falgargaare (auxiliary) iyo qurub diidmo (negative particle), sida :

Afingiriisi

Afsoomaali

Hadal : "I won't come". "Lama iman".



will not



la ma

Qoraal : I will not come La ma iman.

Marka hadalka, ereyga "lama" waxa weeye qurub (xaraf, particle) maldah iyo qurub diidmo oo isku dhafmay. Waxa waajib ah in la kala qoro marka qoraalka. Waxa ay sidaasi hawl yaraynaysaa marka la doonayo in la cilmiyeeyo dhismaha ama naxwaha afka oo laga ma maarmaan u ah horumarintiisa iyo kobcintiisa.

Marka hadal iyo qoraal la kala hufayo, waxa loo cuskadaa laba sharci oo ka mid ah sharciyada ka abuurmay cilmiga afafka. Ka hore waxa weeye sharci qaba : "Erey la ma kala qori karo, haddii macnihiisu doorsoomayo ama jabayo". Midkan waxa tusaale u ah :

- | | <u>Erey dhan.</u> | <u>Erey kooban.</u> |
|----------------------|-------------------|---------------------|
| 1. Ereyga : | doorsaday | waxaan |
| | | |
| 2. Kala qoriddiisa : | door saday* | waxa aan |

Marka sare ee ereyyadu dhan yihiin, muran ka ma taagna oo waa la kasi karaa macnaha labada erey ba. Marka hoose ee ereyyadii mid walba loo kala qoray labo erey, waxa cad in labada erey ee "door" iyo "saday*" ka hore macne dhan yahay, ka dambe se macne jaban yahay calaamadda wehelisa na macnadaridiisa loogu biirshay. labada erey ee dambe "waxa" iyo "aan" waa ay macne dhan yihiin. Kolkaas ereyga "doorsaday" la ma fidin (expand) karo, maxaa yeelay fidsanaantiisu waa ay jaban tahay oo macnihii hore ayaa doorsoomay. Ereyga se "waxaan" waxa loo fidin karaa laba erey iyada oo macnihii ereygu sidii hore yahay.

Sharciga labaad waxa weeye : "haddii erey labo erey laqa dhiqo, labada erey ee dhashay, waa in ay ka mid noqon karaan qaybaha hadalka (parts of speech) ee afkaas". Markaas labada erey ee "waxa" iyo "aan" waxa weeye "waxa" oo magac wakiil (noun substitute) ah iyo "aan" oo magacuyaal yeeleed (subjective pronoun) ah. Laakiin se labada erey ee "door" iyo "saday*" waxa weeye "door" oo fal iyo magac ba noqon karta iyo "saday*" oo walaw ay rogrogid (conjugation) fal lee tahay oo lifaaq tahay, hadda na aanay ka mid noqon karin qaybaha hadalka ee Afsoomaliga. Sababta oo ah, macne dhisme lifaaqan mooyaan, ma laha macne dhisme xor (free structural meaning) ah iyo macne buuxa (lexical meaning) mid na.

Markii aan baadhayay meelaha kooban Afkeenna iyo fidintooda, waxa aan ku shaqaynayay labadaas sharci ee ka mid ah sharciyada badan ee aasaaska u ah cilmiga afafka. Kala duwanaanta qoraalka iyo hadalka, waxa aad ku kala garan kartaa labadan hadal ee hoos ku qoran. Ka hore waa hadal hadal ah, ka dambe se waa hadal qoraal ah.

1.1 HADALKA

[Habeen hore waxaan ka cunteeyay waabay wax ku kariso islaan garasho badanoo dheer. Waxaan soo galay waabta anoo gaajaysan, **markiibana** waxaan ku dhacay kursi **qoriyahoo** miis ku dhaw. Markaan isku hubsaday buu ila dhacay. Waabta islaantii ka shaqaynaysay bay gargaartayoo qacantay qabtay. Anigoo wareersan **bay** fadhiisay midaan kii **dhaaminoon** dhacayn, laakiinse liqliiqanaya. Markaan wareer gooyay **bay** tidhi, "hooyo **maroontay**?"

Waxaan ugu jawaabay, "waan **ladnahaye**, wax la cunaa ma yaalliin?"

"Wax laysku **dayoon** caano ahayn, **diyaarihina** ma yaalliin." **Ayaygu** jawaabtay.

Waxaan idhi, "Maxaa dhacay?"

Waxay tidhi, "waa goor dambee saacaddaada eeg."

Saacaddayduba, saw, way fadhiisatay, tobankiina way tilmaamysaa. Wagtiguna wuxuu ahaa goor damboo cagtii go' day, waabtana waaba layska xidhayay. Waxaan u sheegay islaantii inaan dhawr caano maal cunto haleeli waayay, oon waxaan hilib iyo bariis ahayni, **waxbayga** taraynin. Intay yara aamustay **bay** tidhi, "sug", oo iga dhaqaaday. Goor hal gabanihi ka dambaysay **bay** keentay sixni ka buuxa bariis iyo hilib.

Maalintaas, haddaan lay bixin islaantaas, cunto **layma** haleen].

Haddii aad u fiirsato qoraalkan kor ku qoran, waxa aad garan kartaa in ay jiraan 1) labo erey oo isku erey u qoran - kuwa jiidinta leh ; iyo 2) labo erey in ka badan oo isku erey u qoran - kuwa aad u madaw. Labadan ammuurood waxa ay muujinayaan dhaqanka hadalka. Waxa na dhaliya degdegsiinyaha u gaarka ah hadalka. Qofka aan kala baran dhaqanka hadalka iyo kan qoraalka, aad ayaa ay ugu adag tahay in uu kala sooco labada. Maxaa yeelay, waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin hadalka iyo qoraalku, waa la bartaa ee ma aha aqoon lagu dhasho.

Ereyyada hadalkan sare ee qoran, jiidinta lihi, waxa ay mid kasta ka kooban tahay labo erey. Marka qoraalka waa in la kala qoraa. Kolka ay isku qoran

yihiin, waxa aan ku magacaabay koobnaan. Kolka ay kala qoran yihiin se, waxa aan u baxshay fidanaan.

1. Labo erey oo isku qoran, sida :

KOOBNAAN	----->	FINSANAAN
1. Waxaan	----->	waxa aan.
2. Waabay	----->	waab ay.
3. Badanoo	----->	badan oo.
4. Anoo	----->	aniga oo.
5. Markaan	----->	markii aan.
6. Buu	----->	baa uu.
7. Bay	----->	baa ii.
8. Gargaartayoo	----->	gargaartay oo.
9. Gacantay	----->	gacanta i.
10. Anigoo	----->	aniga oo.
11. Midaan	----->	mid aan.
12. Laakiinse	----->	laakiin se.
13. Bay	----->	baa ay.
14. Waan	----->	waa aan.
15. Laysku	----->	la isku.
16. Waxay	----->	waxa ay.
17. Dambee	----->	dambe ee.
18. Saacaddayduba	----->	saacaddaydu ba.
19. Way	----->	waa ay.
20. Tobankiina	----->	tobankii na.
21. Way	----->	waa ay.
22. Waqtiguna	----->	waqtigu na.
23. Wuxuu	----->	waxa uu.
24. Damboo	----->	dambe oo.
25. Waabtana	----->	waabta na.
26. Waaba	----->	waa ba.
27. Inaan	----->	in aan.
28. Oon	----->	oo aan.
29. Waxaan	----->	wax aan.
30. Intay	----->	intii ay.
31. Gabanihi	----->	gaban ihi.
32. Haddiyaan	----->	haddii aan.
33. Lay	----->	la ii.
34. Layska	----->	la iska.

Hadalka qoran ee sare, ereyyada madoobi, waxa ay mid kasta ka kooban tahay labo erey waxa ka badan ; kala fidintoodu na waa sidan hoose.

2. Labo erey in ka badan, oo isku qoran, sida :

<u>KOOBNAAN</u>		<u>FIDSANAAN</u>
1. Markiibana	----->	markii ba na.
2. Qoriyahoo	----->	qori ah oo.
3. Bay	----->	baa ay ii.
4. Dhaaminoon	----->	dhaamin oo aan.
5. Maroontay	----->	ma roon tahay.
6. Ladnahaye	----->	ladan ahay ee.
7. Dayoon	----->	dayo oo aan.
8. Diyaarihina	----->	diyaar ihi na.
9. Ayaygu	----->	ayaa ay iigu.
10. Waxbayga	----->	wax baa iga.
11. Bay	----->	baa ay i.
12. Layma	----->	la ii ma.

Waxa aynu halkan ka garan karnaa erey marka uu kooban yahay in uu yeelan karo fidsanaan dhawr siyood ah. Tusaale ahaan ereyga "bay" waxay ay fidsanantiisu noqon kartaa :

Bay	----->	1. baa ii, 2. baa ay, 3. baa ay ii, 4. baa ay i, 5. baa i.
-----	--------	--

Bal, u fiirso weedhahan - kooxda 1d. waa uu kooban yahay ereyga "bay", tan 2d. se waa uu fidsan yahay :-

Kooxda 1d.

KOOBNAANTA "BAY".

1. Cali bay keenay buugga.
2. Inanta bay dhirbaaxday hooyadeed.
3. Farriinta bay sheegtay Caashi.
4. Inantu hadal bay tidhi.
5. Cali bay salaamay.

Kooxda 2d.

FIDSANAANTA "BAY".

1. Cali baa ii keenay buugga.
2. Inanta baa ay dhirbaaxday hooyadeed.
3. Farriinta baa ay ii sheegtay Caashi.
4. Inantu hadal baa ay i tidhi.
5. Cali baa i salaamay.

Waxa weedhahan ku cad in ereyga "bay" uu lee yahay shan macne oo ka dhashay dhismaha weedhaha uu ku jiro. Haddii ereyyada uu ka kooban yahay ereygu isku duubnaan loo qoro, waxa dhib noqonaysa meelaha qaarkood shantaas dhisme kii qoruhu macnihiisa u jeedo. Bal, eeg weedha saddexaad :

3. Farrinta bay sheegtay Caashi.

Weedhan macneheeda saddaxdan weedhood tee baa qoruhu ula jeedaa :

- (i) Farrinta baa ii sheegtay Caasha.
- (ii) Farrinta baa ay ii sheegtay Caashi.
- (iii) Farrinta baa ay sheegtay Caashi.

Saddexdan weedhood ee ka dhalan kara weedha 3d., macnahoodu waxa weeye :

1. Farrinta aan helay ayaa Caasha war iga siisay.
2. Caasha ayaa aniga ii sheegtay farrinta.
3. Caasha ayaa sheegtay farrinta.

Marka waxa dhib ah in la kaso saddexdaas macne tii ay lee tahay ee qoruhu ula jeedo weedha saddexaad ee ereyga "bay" uu ku jiro.

Waxa kale oo iyadu dhib noqonaysa in la sugo ereygani "bay" qaybta hadal (part of speech) ee uu ka mid yahay-ma magac (noun) baa, ma fal (verb) baa, ma se waa qurub (particle ama xaraf) ? Ereyga kooban ama isku duuban qaybtiisa hadal la ma sheegi karo. Qofkii qayb qabadsiiyaa na, ma sugna qeexidiisu. Maxaa yeelay, waxa aynu ogsoon nahahay in marka "bay" la fidiyo ama la kala saaro aanuu macnuhu is beddelayn. Markaas na uu yahay saddex erey ama labo erey. Haddii aynu fidinno se, waxa inoo hawl yaraanaysa in aynu labada ama saddexda erey ee uu ka kooban yahay mid ba qaybtiisa haybin karno.

Marka aynu ka soo qaadno, kolka uu labada yahay :

1. baa ii,
2. baa ay,
3. baa i,

waxa aynu hawl yari u ogaanaynaa in ay :

1. "baa" qurub tahay ;
2. "ii" magacuyaal meeleeeye (prepositional pronoun) tahay-"u" oo meeleeeye (preposition) ah iyo oo magacuyaal layeele (object pronoun) ah, oo isku dhafmay ;
3. "ay" na ay tahay magacuyaal yeeleed (subject pronoun).

Haddii aynu eegno marka uu saddexda yahay :

1. baa ay ii,
2. baa ay i ;

waxa aynu ogaanaynaa in ay :

1. "baa" tahay qurub ;
2. "ay" na tahay magacuyaal yeeleed ;
3. "i" na tahay magacuyaal layeele ;
4. "ii" na tahay magacuyaal meeleeeye ("u" oo meeleeeye ah iyo "i" oo magacuyaal yeele ah, oo isku dhafmay).

Waxa tusaalayaashan inooga caddaanaya, in ay koobiddu tahay labo erey ama in ka badan oo isku duubmay. Iyada oo la kala saaro ereyyada mooyaan ee aan la tilmaami karin ereyga koobani dhisme ahaan iyo macne ahaan ba waxa uu yahay. Ereyyada isku dhafmay kala saarkoodu na, waxa uu yahay mid loo baahan yahay marka qoraalka.

1.2 QORAALKA

Hadda waxa aan dib u qorayaa hadaalkii qornaa, oo imminka aan u beddelay qoraal qoran. Waxa aan filayaa in akhristuhu, ereyyada aan kala qoray uu isagu na kala qoro oo uu garawsado fikraddan fidsanaanta iyo macnaha ay gudbinayso.

[Habeen hore waxa aan ka cunteeyay waab ay wax ku kariso islaan garasho badan oo dheer. Waxa aan soo galay waabta aniga oo gaajaysan, markii ba na waxa aan ku dhacay kursi qori ah oo miis ku dhaw. Markii aan isku habsaday baa uu ila dhacay. Waabta islaantii ka shaqaynaysay baa ii gargaartay oo gacanta i qabatay. Aniga oo wareersan baa ay i fadhiisay mid aan kii dhaamin oo aan dhacayn, laakin se liiqliqanaya. Markii aan wareer gooyay baa ay i tidhi, "hooyo, maroontahay ?"

Waxa aan ku jawaabay, "waan ladnahaye, wax la cunaa ma yaalliin?"

"Wax laysku dayoon caano ahayn, diyaarihina ma yaalliin." Ayaa ay iigu jawaabtay.

Waxa aan idhi, "Maxaa dhacay ?"

Waxa ay tidhi, "Waa goor dambee saacaddaada eeg."

Saacaddaydu ba, saw, waa ay fadhiisatay, tobankii na waa ay tilmaamaysay. Waqtigu na waxa uu ahaa goor dambe, oo cagtii go'day, waabta na waa ba la iska xidhayay. Waxa aan u sheegay islaantii in aan dhawr caano maal cunto haleeli waayay, oo wax aan hilib iyo bariis ahayni wax ba iga taraynin. Intii ay yara aamustay baa ay i tidhi, "sug", oo iga dhaqaaday. Goor hal gaban ihi ka dambaysay baa ay ii keentay sixni ka buuxa bariis iyo hilib.

Maalintaas haddii aan la ii bixin islaantaas, cunto la ii ma heleen].

Waxa aynu qoraalkan ka dhuuxi karnaa in aanuu erey ku duubnayn erey kale ee uu mid waliba gooni u qoran yahay. Marka se la isku duubo ereyyo, ay tahay sumad hadalka u gaar ah, sida weedhaha ku jira labada kolmood, oo muujinaya hadalka haasaawaha ah ee qofku yidhi.

Qoraalku waxa uu lee yahay oo gaar u ah habka fidsanaata, oo erey kasta ay tahay laga ma maarmaan in uu gooni u qormo, haddii aan looga jeedin in uu yahay hadal la qoray sida sheekaysiga kor ku qeexan. Marka qoraalka waxa hawl yaraanaysa kala soocidda ereyyada, taas oo salka ku haysa qaybaha hadalka ee Afsoomaaliga. Qaybaha guud ee hadalka ee Afsoomaaligu lee yahay waa saddexdan :

1. Magac (noun) ;
2. Fal (verb) ; iyo
3. Qurub (particle, xaraf).

Saddexdaas qaybood mid waliba waxa ay lee tahay qaybo hoose yimaada qaybta guud. Kala soocidda ereyyadu waxa ay suuragalaysaa oo keli ah, marka erey waliba uu gooni u qoran yahay. Haddii se dhawr erey ay isku duuban yihiin, waa ay adag tahay in qayb lagu sheego ereyga isku duuban ama kooban.

1.3 KOOBIDDA IYO FIDINTA.

Xubintani waxa ay ka kooban tahay (1) meelo ay hawl yar tahay fidintu ; (2) meelo ay adag tahay ; iyo (3) meelo aanay habboonayn.

1. Meelaha ay fudud tahay fidintu waxa ka mid ah :-

- (i) Magac, (qodob-article) iyo magacuyaal yeeleed oo isku duubmay, sida :

') Koobnaan :

<u>Geedaan</u>	(geedkaan)	beeray
<u>Geedaannu</u>	(geedkaannu)	beernay
<u>Geedaynu</u>	(geedkaynu)	"
<u>Geedaad</u>	(geedkaad)	beertay
<u>Geedaydin</u>	(geedkaydin)	beerteen
<u>Geeduu</u>	(geedkuu)	beeray
<u>Geeday</u>	(geedkay)	beertay
<u>Geeday</u>	(geedka)	beereen

ayaa Cali jaray.

b) Fidsanaan :

	aan	(aan)	beeray
	aannu	(aannu)	beernay
	aynu	(aynu)	"
Geed	aad (geeka/geedkii aad)		beertay
	aydin	(aydin)	beerteen
	uu	(uu)	beeray
	ay	(ay)	beertay
	ay	(ay)	beereen

ayaa Cali jaray.

- (ii). Magac, (qodob), qurub weedheed (sentence particle), iyo magacuyaal yeeleed oo isku duubmay, sida :

') **Koobnaan** :

<u>Geedaan</u>	(geedkaan)	beerayaa
<u>Geedaannu</u>	(geedkaannu)	beeraynaa
<u>Geedaynu</u>	(geedkaynu)	"
<u>Geedaad</u>	(geedkaad)	beeraysaa
<u>Geedaydin</u>	(geedkaydin)	beeraysaan
<u>Geeduu</u>	(geedkuu)	beerayaa
<u>Geeday</u>	(geedkay)	beeraysaa
<u>Geeday</u>	(geedkay)	beerayaan

ee Cali ha biyeeyo.

b) **Fidsanaan** :

Geedka	ayaa	aan	beerayaa
Geed/geedkii	baa	aannu	beeraynaa
Geedku	waa	aynu	"
		aad	beeraysaa
		aydin	beeraysaan
		uu	beerayaa
		ay	beeraysaa
		ay	beerayaan

ee Cali ha biyeeyo.

(iii). Ereyga, "waxa", iyo magacuyaal yeeled, oo isku duubmay, sida :

') **Koobnaan** :

Waxaan	tegay
Waxaannu	tagnay
Waxaynu	"
Waxaad	tagtay
Waxaydin	tagteen
Wuxuu	tegay
Waxay	tagtay
"	tageen

cayaarta.

b) Fidsanaan :

Waxa	aan	tegay	cayaarta.
	aannu	tagnay	
	aynu	"	
	aad	tagtay	
	aydin	tagteen	
	uu	tegay	
	ay	tagtay	
	"	tageen	

(iv) Ereyga "wax", qurub weedheed iyo magacuyaal yeeleed, oo isku biiray, sida :

') Koobnaan :

<u>Waxaan</u>	helay	ee yaa leh ?
<u>Waxaaannu</u>	helnay	
<u>Waxaynu</u>	"	
<u>Waxaad</u>	heshay	
<u>Waxaydin</u>	hesheen	
<u>Wuxuu</u>	helay	
<u>Waxay</u>	heshay	
"	heleen	

b) Fidsanaan :

Wax	baa	aan	helay	ee yaa leh ?
	ayaa	aannu	helnay	
	waa	aynu	"	
		aad	heshay	
		aydin	hesheen	
		uu	helay	
		ay	heshay	
		"	heleen	

2. Meelaha ay adag tahay fidintu waa dhawr, waxa na ka mid ah :-

(i) Marka ay isku biiraan erey hawl "tilmaame" (Adjective) haya iyo falahaanshaha "ahay" (Verb to be), sida :

) Koobnaan :

I		II	
Waan	<u>madoobahay</u>	Waan	<u>ladnahay</u>
Waannu	madawnahay	Waannu	ladannahay
Waynu	"	Waynu	ladannahay
Waad	<u>madawdahay</u>	Waad	ladantahay
Waydin	<u>madawdihiin</u>	Waydin	ladantihiin
Wuu	madawyahay	Wuu	ladanyahay
Way	<u>madawdahay</u>	Way	ladantahay
"	madawyihiin	"	ladanyihiin

Tusaalahan sare, meelaha suntan waxa adag kala qoridda tilmaamaha "madaw/ladan" iyo fal "ahay" ; Kuwa aan suntanayn se waa ay hawl yar tahay fidintu, maxaa yeelay labada erey ba mid na wax iska ma beddelin ee mid wali ba waa asalahaantiisii, sida :

) Fidin hawl yar

I		II	
	aan		aan
	aannu madaw nahay		aannu ladan nahay
	aynu " "		aynu " "
Waa	aad	Waa	aad ladan tahay
	aydin		aydin ladan tihiin
	uu madaw yahay		uu ladan yahay
	ay		ay ladan tahay
	" madaw yihiin		" ladan yihiin

b) Fidinta adag :

Waxa is beddela codad erey ka mid ah.

(i) aan habboonayn :

Waa

aan	madooba	hay
aad	madaw	dahay
aydin	madaw	dihin
ay	madaw	dahay

Waa

aan	lad	nahay
-----	-----	-------

(ii) habboon :

Waa

aan	madaw	ahay
aad	madaw	tahay
aydin	madaw	tihin
ay	madaw	tahay

Waa

aan	ladan	ahay
-----	-------	------

3. Meelaha aanayn habboonayn kala qoridda ereyyada isku duubmay, waxa ka mid ah :

(i) Qurubka diidmo ee "aan" iyo magacuyaal yeeleed, sida :

') Koobnaan :

Waxa

aanan
anaan
aynaan
aanad
aanaydin
aanu
aanay
"

tegin magaalada.

b) Fidsanaan :

Waxa aan

aan
aannu
aynu
aad
aydin
uu
ay
"

tegin magaalada. (aad baa ay dhegtu u diidaysaa).

Fidintu meelaha qaarkood aad ayaa ay u biixiyaysan tahay. Ma na u fududa sidan fidinta meelaha adag. Bal, u fiirso, ereyga "maxay" ma isku sinji baa labadan su' aalood :

1. Maxay doonaysaa ?
2. Waa Maxay tani ?

Haddii ay isku sinji yihiin, waa in ay isku fidsanaan noqdaan. Fidintu waa in aanay murtida su'aasha beddelin.

1. Ma wax baa ay doonaysaa ?
2. Waa ma wax baa ay tani ?* (waa ay murti burburtay).

Go'aan : ereyga "maxay", weedha hore waa uu fidsami karaa. Ta dambe se ma fidsami karo. Marka aad Afingiriisi u tarjunto, waxa aad moodaysaa in ay ladada erey isku sinji yihiin, oo ay u dhigmaan ereyga "what" ; fidinta sare se waxa aynu ku ogaanay in aanay sidaasi sugnayn.

II. JAWAABAH

1.4 Laylisyo Bogga 4d.

Layliska 1d.

- | | |
|-----------------|-----------------|
| 2. q-o-f (3) | 3. k-e-l-i (4) |
| 4. t-a-l-o (4) | 5. b-a-d (3) |
| 6. d-i-n (3) | 7. a-w-r (3) |
| 8. k-o-w (3) | 9. s-h-i (3) |
| 10. s-h-a-d (4) | 11. s-h-e-k (4) |

Layliska 2d.

- | | |
|--------------------|---------------------------|
| 2. r-o-d-h-i (5) | 3. d-h-a-m-n (5) |
| 4. m-a-l-b (4) | 5. c-a-y-n (4) |
| 6. k-h-a-m-i-s (6) | 7. b-i-l-a-d (5) |
| 8. B-i-y-0 (4) | 9. c-a-n-o (4) |
| 10. r-a-s (3) | 11. n-a-b-d-g-e-l-y-o (9) |

Layliska 3d.

- | | |
|-------------------|--------------------|
| 2. q-o-f (3) | 3. k-e-l-i (4) |
| 4. k-a-n (3) | 5. k-u-w-a-n (5) |
| 6. g-o-d-i-n (5) | 7. x-u-b-i-n (5) |
| 8. h-a-d-l-i (5) | 9. c-a-s-r-i (5) |
| 10. a-n-s-x-i (5) | 11. b-e-dd-l-i (5) |

Layliska 4d.

- | | |
|---------------------|---------------------|
| 2. k-a-r-uu (4) | 3. m-a-s-g-o (5) |
| 4. m-a-g-aa-l-d (6) | 5. G-aa-sh-n (4) |
| 6. b-u-n-d-g (5) | 7. j-i-dh-o (4) |
| 8. j-i-r-t-o (5) | 9. sh-a-b-ce-l (5) |
| 10. h-a-dh-uu- (4) | 11. h-a-dh-uu-b (5) |

1.4 Laylisyo Bogga 9d.

Layliska 1d.

- | | | | |
|-----|----------------|-----|----------------|
| 2. | <u>dhaddig</u> | 3. | <u>dhaddig</u> |
| | eyyad | | gashaanti |
| 4. | geenyo | 5. | dooro/digaagad |
| 6. | eddo | 7. | ayeeyo |
| 8. | habaryar | 9. | gabadh |
| 10. | Abeeso | 11. | sodoh |

Layliska 2d.

Labood

1. shaadhka
4. shukmaanka
5. masarka
7. surwaalka
9. shaatiga
12. suunka
14. shaalka
17. kesheliga
18. weesaaqa
20. fargalka

dhaddig

2. macawista
3. garbasaarta
6. marada
8. saacadda
10. fasaleetiga
11. kabta
13. cimaamadda
15. malkhabadda
16. googarradda
19. silisiladda

Layliska 3d.

- | | | |
|--------------|-----------|-----------------|
| 2. Finan | 3. Tiirar | 4. Marar |
| 5. Muusas | 6. Moosas | 7. Suuman |
| 8. Shaadhahd | 9. Habab | 10. Sanan/suman |
| 11. afaf | | |

2.3 Laylisyo Bogga 11d.

Layliska 1d.

- | | |
|------------------|--------------|
| 2. cabayaa | cabayay |
| 3. dheeraanayaa | dheeraanayay |
| 4. qasayaa | qasayay |
| 5. doorayaa | doorayay |
| 6. furayaa | furayay |
| 7. xidhayaa | xidhayay |
| 8. Jarayaa | jarayay |
| 9. Cuslaanayaa | Cuslaanayay |
| 10. fududaanayaa | fududaanayay |
| 11. Tirayaa | tirayay. |

Layliska 2d.

- | | |
|-------------|---------|
| 2. diraa | diray |
| 3. hadlaa | hadlay |
| 4. wacaa | wacay |
| 5. maqlaa | maqlay |
| 6. baraa | baray |
| 7. tumaa | tumay |
| 8. gaabnaa | gaabmay |
| 9. Jabnaa | jabmay |
| 10. xidhnaa | xidhmay |

Layliska 3d.

1. Dhuubnaaday
2. Furtay
3. Furay
4. Dhuubnaaday
5. Dhuubnaatay
6. Furnay
7. Dhuubnaanay
8. Dhuubnaateen
9. Fureen
10. Dhuubnaadeen

Layliska 4d.

1. Hadlaa
2. Buurnaataa
3. Hadlaa
4. Buurnaadaa
5. Hadashaa
6. Buurnaanaa/buurraanaa
7. Hadashaan
8. Hadlaan
9. Buurnaadaan/buurraadaan

3.4 Laylisyo Bogga 14d.

Layliska 1d.

2. t. Qalinka iyo dhalada ayaa jabay.
3. t. Qalinka ayaa dhacay oo jabay.
4. t. Islaanta iyo inanta ayaa yimid.
5. t. Biyihii ayaa kululaaday oo karay.
6. t. Shaadh iyo shaayad ayaa gubtay.
7. t. Raadiyaha ayaa daarmay oo hadlay.
8. t. Baabuur iyo baaskeel baa muuqda.
9. t. Ilmaha Caanihii baa ka xumaaday oo daatay.
10. t. Neefkii libaax baa helay oo cunay.
11. t. Gabadhii iyo hooyadeed mas baa qaniinay.

Layliska 2d.

2. t. Dhalo ama muraayad ayaa jabtay.
3. t. Caleentii ama ubixii baa daatay.
4. t. Dabkii ama dhuxushii baa shidmay.
5. t. Daruur ama ceeryaamo baa cirku lee yahay.
6. t. Qalin ama masaxad i sii.
7. t. Sinimihii ama riwaayaddii Cali baa galay.
8. t. Gurigii ama xaafaddii Caasha ayaa tagtay.
9. t. Shaadhkii ama surwaalkii ayaa jeexmay.
10. t. Bakhaarkii ama dukaankii Cali baa tegay.
11. t. Inankii ama inantii baa yimid.

Layliska 3d.

2. t. Ninku waa (uu) hadlayaa ama (waa uu) tegayaa.
3. t. Dabkii waa (uu) baxayaa ama (waa uu) shidmayaa.
4. t. Geedku waa (uu) magoollan yahay ama (waa uu) cagaaran yahay.
5. t. Irriddu waa (ay) xidhan tahay ama (waa ay) ceshan tahay.
6. t. Geelii waa (uu) caymaday ama (waa uu) la dhacay.
7. t. Awrkii waa (uu) lumay ama (waa uu) caymaday.
8. t. Cali waa (uu) gudbi intixaanka ama (waa uu) dhici.
9. t. Gidaarku waa (uu) dhismi ama (waa uu) dumi.
10. t. Xoghayihii waa (uu) baxay ama (waa uu) hoyday.
11. t. Ardaygu waa (uu) bukaa ama (waa uu) caataysan yahay.

3.3 Laylisyo Bogga 21d.

Layliska 1d.

- | | | | | |
|------|------|-------|-------|-------|
| 3. D | 4. D | 5. B | 6. B | 7. D |
| 8. D | 9. D | 10. B | 11. B | 12. D |

Layliska 2d.

- | | |
|----------|-------------|
| 2. waa | 3. ayaa |
| 4. waa | 5. baa |
| 6. waa | 7. baa/ayaa |
| 8. waa | 9. waa |
| 10. ayaa | |

Laylis 3d.

- | | | |
|---------------|-----------------------|-----------------------|
| 2. ma-abyane | 9. farcan | 16. lammaane |
| 3. farcan | 10. ma-abyane | 17. tilmaameed |
| 4. abyane | 11. abyane | 18. farcan |
| 5. abyane | 12. farcan | 19. lamaane |
| 6. lammaane | 13. lamaane | 20. farcan/tilmaaneed |
| 7. tilmaameed | 14. farcan/tilmaameed | 21. abyane. |
| 8. abyane | 15. ma-abyane | |

Layliska 4d.

- | | |
|---------------|---------------|
| 2. nooca 1d | 3. nooca 2d. |
| 4. nooca 4d | 5. nooca 5d. |
| 6. nooca 3d | 7. nooca 4d. |
| 8. nooca 2d | 9. nooca 5d. |
| 10. nooca 3d | 11. nooca 4d. |
| 12. nooca 1d | 13. nooca 1d. |
| 14. nooca 3d | 15. nooca 5d. |
| 16. nooca 2d | 17. nooca 1d. |
| 18. nooca 4d | 19. nooca 5d. |
| 20. nooca 3d. | |

4.3 Laylisyo Bogga 29d.

Layliska 5d.

- | | |
|-------------|----------------|
| 2. Ma aan | 12. Buugga aan |
| 3. Ma aad | 13. Qalin uu |
| 4. Ma uu | 14. baa ay |
| 5. Ma ay | 15. Buug aan |
| 6. Ma aannu | 16. baa aad |
| 7. Ma aynu | 17. Wax aad |
| 8. Ma aydin | 18. Waqti ma |
| 9. Ma ay | 19. ma la |
| 10. Goor ma | 20. ma ka. |
| 11. Ma ka | |

III. EREYBIXINIA.

ASTAAMAYN : (ترقيم); Punctuation ; punteggiatura) waa hab ama nidaam caalaamado xarfaha ka duwan leh, oo lagu qorsheeyo fikradaha qoraalka.

ASTAMAYN SUGAN : (ترقيم مضبوط); correct punctuation ; punteggiatura corretta) waa sida habboon ee astaan ku qorshaysa fikradaha qoraalka.

ASTAAMAYN QALDAN : (ترقيم خطأ); incorrect punctuation ; punteggiatura inesatta) waa sida aan habboonayn ee astaan ku qorshaynta fikradaha qoraalka.

AFTALYAANI : (اللغة الإيطالية); Italian language ; lingua Italiano ;) waa dadka talyaaniga u dhashay afkooda hooyo.

AFINGIRIIS : (اللغة الإنجليزية); English language ; Lingua ingles) waa afka hooyo ee ay isku af gartaan dadka ku nool dal ingiriiska, hadda se ah afka hooyo oo dalal badan oo aan ingiriis ahayn ama u dhalan.

AFSOOMAALI : (اللغة الصومالية); Somali language ; lingua somala) waa afka hooyo ee Soomaalidu ku wada hadasho.

AFCARBI : (لغة عربية); Arabic language ; Lingua arabo) waa afkooda hooyo dadweynaha carbeed iskula hadlaan.

ALIFBA : (حرف هجائي); Alphabet ; alfabeto) waa xarfaha lagu sunto ama lagu qeexo codadka af lee yahay.

TUSAALE : (مثال); example ; esempio) waa hadal fikrad qeexaya.

TUSE : (جدول); Table ; tabella ;) waa shaxan hadal kala qaybsha.

KARAF : (حرف); Letter ; Lettera dell' alfabeto) waa calaamadaha ama summadaha codadka af lee yahay lagu sunto.

DHADDHIG : (مؤنث); female/feminine ; femminile) waa habka dhaddigaansho ee macne ama naxwe ee af lee yahay aan se ku xidhnayn naagnimo iyo ninimo.

EREY : (كلمة); Word ; parola) waa cod ama in ka badan oo luqad ka mid ah, laakiin se yeesha macne dhan ama dhiman.

EREYEYN : (علم تكوين وتركيب الكلمات); reduction, riduzione) waa erey qeexaya fikradda lagu haybiyo weedh saleed. Marka erey keli ah ee weedhu hari waayo waa weedh saleed.

SAL : (اساس); base ; fondamentale) waa erey qeexaya erey aan cod ka bixin karayn ama weedh aan erey ka bixi karayn.

SHARCI : (قانون); rule ; regola) waxa heer hoose oo naxwe.

SHAHQAAL : (حرف علة متحرك); vowel ; vocale) waa erey qeexaya cod ku samaysma afka laakiin se aan laba xubnood oo afka ka mid ihi isu dhawaan.

SHIBBANE : (حرف صامت أو ساكن); (Consonant ; consonante) codka samaysa marka laba xubnood oo afka ku yaallaa ay ku kulmaan ama isku dhawaadaan.

SUNTAN : (سوم بعلامة); marked ; segnato ;) waa lahaansh astaan ama sumad naxweed oo erey asalkiisa ka kaxaysa.

GOORAYN : (زمن الفعل); Tense ; tempo) waa habka fikireed ee maskaxda qofku ula dhaqanto waqtiga joogteysan ee aan qofku xukumin.

GOORAYN AMAR : (زمن الفعل الأمر); imperative mode ; modo imperativo presente) waa falamrku goorta ammineed ee uu dhaco.

GOORAYNTA TAGTO : (زمن الفعل الماضي المجرد); simple past tense ; passato remoto) waa falid dhacday waqti tegay.

GOORAYN SOCOD TAGTO : (فعل ماضي متدرج); past progressive tense ; imperfetto indicativo passato progressivo) was falid soconaysay waqti tegay.

GOORAYN SOCOD JOOGTO : (زمن حاضر متدرج); present progressive tense ; presente indicativo (forma progressivo)) waa falid soconaysa waqti jooga.

GOORAYN JOOGTO : (زمن الفعل الحاضر المجرد); simple present tense ; presente abituale assoluto) waa falid dhacaysa had walba ama waqti kasta.

CAYN : (جنس); gender ; genere) waa hab macne ama naxwe dhaddignimo iyo laboodnimo oo saameeya magacyada af lee yahay, aan se ku xidhnayn ninnimada iyo naagnimada.

COD : (صوت); sound, phoneme ; suono, fonema) waa codka u yeesha murti macne afka uu ka mid yahay.

CODAYN : (علم الأصوات المفوظة); phonology ; fonologia) waa barashada cilmiga codadka ee af lee yahay.

FALAHAANSHO : (فعل كان); verb to be ; verbo essere) waa erey fal ah laakiin se qeexaya ahaansho.

FAL TILMAAMEED : (فعلي); verbal ; verbale) waa erey qeexaya fal hawl tilmaame qaban kara.

FAL FARCAN : (فعل استنتاج); derived verb ; verbo derivato) waa fal sal ah oo uu ku biiray lifaaq macne ku kordhiya.

FAL : (فعل); verb ; verbo) waa qaybta saddexaad ee qaybaha hadalka Afsoomaaliga ama ereygii goorayn iyo rogoogid yeesha.

FAL ABYANE : (منظم الحركة); regular verb ; verbo regolare) waa erey fal ah oo gadaal keli ah iska rogoga.

FAL LAMMAANE : (فعل مركب); compound verb ; forma composta del verbo) waa laba erey oo hawl fal haya.

FAL MA-ABYANE : (فعل غير قياس); irregular verb ; verbo irregolare) waa falka hore iyo gadaal iska rogoga.

FIDSANNAAN : (توسيع); expansion ; forma piena, non contratta) waa hawsha kala qoridda marka qoraal, ereyyo isku koobmay marka hadalka.

KELI : (مفرد); singular ; singolare) waa erey qeexaya kelinimada erey dhaddig iyo lab ba.

- KOOBID** : (انقباض) contraction ; contrazione, forma contratta) waa hawl hadal oo isugu keenta dhawr erey hal erey.
- LABOOD** : (مذكر) ; male ; masculine ; maschile) waa habka laboodnimada ee macne ama naxwe ee af lee yahay, aan se ku xidhnayn ninnimada.
- LAYLIS** : (تمرين) ; exercise ; esercizio) waa tababarid jidh ama maskaxeed oo ku salaysan hawl qabad.
- LIFAAQ** : (مطرف) ; affix ; affisso) waa erey dhiman oo ku lifaaqan erey dhan ama erey dhiman.
- MAGAC** : (اسم) ; noun ; nome ;) waa qaybta Id ee qaybaha hadalka oo ah erey qeexaya wax, hab, xaalad ama qof.
- MAGACUYAAL YEELEED** : (ضمير فاعل) ; subject pronoun ; pronome soggettivo) waa magacuyaallada yeelaha noqda.
- MACNE DARAN** : (بلا معنى) ; nonsensical, meaningless ; senza senso) waa magaca guud ee ereyga ama odhaahda ama weedha aan macne lahayn lagu aqoonsada.
- MACNE DHIMAN** : (معنى ناقص) ; incomplete meaning ; senso incompleto) waa magaca guud ee ereyga ama weedha macnaheed dhantaalan yahay.
- MEELEEYE** : (حرف جر) ; preposition ; preposizione) waa erey aan macne qaamuus lahayn bal se leh macne naxwe. Falka waa uu ka borreeyaa, magac na waa uu xanbaarxan yahay.
- NAXWE JABAN** : (غير نحوي) ; ungrammatical ; sewogrammaticato) waa erey qeexaya naxwe la' aanta, taas oo macne buuxa, dhantaasha ama dumiysia.
- NOOC** : (نوع) ; kind/type ; tipo) waa erey qeexaya waxa kala nooc ama qaadh ah.
- WADAR** : (جمع) ; plural ; plurale) waa magaca guud ee qeexaya habka wadaraynta ee af lee yahay.
- WEEDH** : (جملة) ; Sentence ; frase) waa ereyyo isdabajooga oo qeexaya macne dhan oo hadal.

WEEDHEYN : (علم تركيب الكلام); syntax ; sintassi)
waa barashda cilmiga naxweed ee weedhaha.

HADAL : (كلام); speech ; lingua parlata) waa
erey qeexaya marka hadal heer hadal yahay.

GAAMUUS : (قاموس، معجم); dictionary ;
dizionario/vocabolario) waa buug kooba macnaha
ereyyada af lee yahay ama kuwo isu dhigma oo laba
af kala lee yihiin.

GODOB : (أداة); article ; articolo) waa erey
qurub ah, laakiin se ku lifaaqma magac oo ku
biiriya macrifad ama aqoonsi gaar ah.

GODOB AQOONSI : (أداة التعريف); definite article ;
articolo definito) waa erey ku lifaaqma magaca oo
ku biiriya macne aqoonsi.

GORAAL : (كتابة); writing ; scrittura) waa
erey qeexaya marka hadalku heer qoraal isu
beddelo.

GOFAYN : (شخص، فرد); person ; persona) waa
habka uu falku ugu aado falka marka dhinaca
magacuyaallada laga eego, ama isku-aadanaanta
yeelaha iyo falkiisa.

GURUB : (حرف); particle ; particella) waa
qaybta saddexaad ee qaybaha hadalka Afsoomaaliga-
ereyyada aan magac iyo fal mid na ahayn.

XIDHIIDHIYE : (حروف عطف); conjunction ;
congiunzione ; Erey aan macne qaamuus lahayn oo
isku xidha odhaahyada iyo weedhaha.

GURUB WEEDHEED : (حرف جملة); sentence
particle ; particella frase) waa qurub tilmaan u ah
weedhaha saleed ee wartebineed.